# Tilmaamaha Waalidka ee Qiimaynada

**Naglieri Nonverbal Ability Test® - NNAT3 (Imtaxaanka Aqoonta Wax Qoriska ee Naglieri)**

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinkaan qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.

## MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

NNAT3 waa magaca lasoo gaabshay ee Imtaxaanka Aqoonta Wax Qorista ee Naglieri®, kaasoo ah cabir kooban, oon hadal ahayn kaasoo lagu cabiro awooda garaadka guudka kaasoo keena buundo lagu saleeyay dabeecada ardayga. Imtaxaanka NNAT3 waxaa kujira macduucyo an hadal ahayn, wuxuu kakooban yahay qaab dhismeedyada cabirka kuwaasoo ah heer caalami ah, tilmaamahiisuna waa kuwo sawiro ah ayna lajiraan tilmaamo hadal ah oo kooban si looga dhigo miday adeegsan karaan tiro badan oo arday ah ayna kujiraan ardayda khibradooda waxbarasho kooban tahay, ardayda kayimaada dhaqan kaduwan kuwa ardayda kale, leh farqi dhinacyada dhaqan dhaqaale, ama asalkooda luuqadeed, iyo ardayda qaba naafo dhanka luuqada ah, qaba xanuunka dhakraariyoowga, ama dhagoolka ah amamaqalkoodu culus yahay.

Imtaxaanka NNAT3 wuxuu kakooban yahay 48 su'aalood oo dookhyo kaladuwan leh oo qaab sawiro ah usamaysan. Imtaxaanku waa mid kuxiran waqtiga qofka, laakiin ardayda waxaa lasiinayaa 30 daqiiqo oo ay kudhamaynayaan imtaxaanka. Ardaydu waxay hubin karaan jawaabahooda kahor intaysan dhamayn imtaxaanka.

## XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Si waafaqsan Sharciga Waxbarashada Gaarka ah ee Caruurta (ECEA), Waaxa Hibada iyo Hadiyada (GT) waxay dhaqan galinaysaa hanaanka imtaxaan guud si ay ugu adeegsato aqoonsiga ardayda ubaahan adeegyada waxbarashada hibada ah xili hore oo xirfadooda waxbarashada ah.

Si fursad loogu baahsho dhamaan ardayda si ay taageero uga helaan goobta ugu haboon, dhamaan ardayda reer DPS ee kujira fasalada koobaad, 2aad iyo 6aad ayaa si ootomaatig ah looga qaadaa Imtaxaanka Aqoonta Wax Qorista ee Naglieri® (NNAT) oo laqaado xiliga dayrta.

Imtaxaanku waa qaab oonleen ah, wuxuuna qaataa kudhawaad 30 daqiiqo in lagu dhameeyo. Imtaxaanka NNAT3 maaha imtaxaan lasoo akhrin karo ama ay tahay in lasoo akhriyo. NNAT3 waa tijaabada awooda ardaygaaga marka uma baahna ardaygu inuu wax soo akhriyo si uu ugu baaso imtaxaanka NNAT3. Waxaan kacaawin kartaa ardaygaaga inuu udiyaar garoobo imtaxaanka adoo xaqiijinaaya inuu helo nasiinada uu ubaahan yahay, uu cuno quraac fiican, aadna kudhiiri galiso inuu dadaalkiisa uu sameeyo intuu karo.

**Xiliyada Imtaxaanka**

Waxaa laguusoo dirayaa waraaqda “Intent to Test” (Ogaysiiska Imtaxaanka) kahor intaan lgaarin xiliga imtaxaanka ayadoo laguugu sheegaayo taariikhaha jadwalka kuqoran ee dugsiga ardaygaaga.  Si aad uhesho macluumaadka maalmaha gaarka ah ee ardaygaagu imtaxaanka galaayo, fadlan waydii macalinka ardaygaaga.

| | |
|---|---|
| Fasalka 6aad | Sebteembar |
| Fasalka 2aad | Daba yaaqanada Sibteembar Bartamaha Oktoobar |
| Ardayda fasalka koobaad | Bartamaha Oktoobar Biloowga Nufeembar |

## WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Buundooyinka NNAT waxaa lagusoo gudbiyaa qaab boqoleey ah kaasoo isbarbardhigaaya natiijooyinka ardaygaaga iyo natiijooyinka koox arday ah oo ay isku da' ama iskufasal yihiin kuwaasoo loodoortay inay noqdaan matalayaasha dad waynaha Maraykanka. Cabirka boqoleeydu wuxuu kuusheegayaa boqolkiiba tirada ardayda isku da'da ay yihiin oo keenay buundo lamid ah ama kahoosaysa tan ardaygaaga. Tusaale, hadii ardaygaagu keeno buundo dhan boqolkiiba 90, taasi waxay kadhigan tahay inuu ardaygu keenay buundo lamid ah ama kabadan 90% ardayda ay isku da'da ama isku fasalka yihiin. Buundada boqolkiiba waxay udhaxaysaa 1 ila 99, buundada 50aad boqolkiiba ayaa ah celceliska da'da ardaygaas.

## SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Ujeedada imtaxaanka guud waa in lasoo aruusho ilaa inta la awoodo oo macluumaad iyo warbixin ah ee macquulka ah si loo dhiso cadayn lagu taageeraayo baahida aqoonsiga hibada ardayga iyo sidoo kale in lagaaro go'aanada meelaynta oo si sax ah ufaahfaahsan ee laxariira uqalmida barnaamijyada baxsha taageerada arayda hibada leh. *Buundooyinkaan waa qayb kamid ah macluumaadka loosoo aruushay cadayn ahaan. Tani waxay kadhigan tahay in buundada hal imtaxaan aysan ardayga u aqoonsan karin mid hiyad iyo hibo leh.*

Dhamaan aqoonsiga hibadu waa inay noqdaan kuwo kusalaysan cdayn, kaasoo ay qasab tahay inay kujiraan natijooyinka imtaxaanada caadiga ah ee heerarka dheeriga ah. Abuurista cadayntu waa hanaan joogto ah kaasoo aan ubaahnayn codsiga waalidka. Cadaynta waa inuu sidoo kale kujiraa iskudarka shuruudaha soosocda kuwaasoo muujinaya awoodaha dheeriga ah: cadaymaha shaqada, tusmada aqoonta, wax qabadka, kormeerada, liiska waxyaabaha la aruurshay iyo/ama waraysiyada. Dhamaan macluumaadka waa dib u eegis iyo qiimayn kusamaynaaya koox tayo sare leh si ay ugo'aanshaan baahiyaha dhanka waxbarashada ee ardayga iyo heerka ugu haboon ee taageerada hibada. Ayadoo laga fiirinaayo heerka baahida, ardaygaaga ayaa xaq uyeelan kara ama uyeelan waayi kara adeegyada hibada.

Ardayda ayaa lagu aqoonsan karaa sadex qaybood: Dhinaca Aqoonta, Awoodooda dabiiciga ah, Awoodooda Hibada Qaaska ah, ama Awoodooda Guud ee Garaadka. Dhinacyada aqoonta waxaa kamid ah: akhriska, wax qorista, xisaabta, sayniska, cilmiga bulshada iyo luuqada aduunka. Awooda dhanka hibada waxaa kujira farshaxanka muuqda iyo kan bandhiga, muusiga, qoob kaciyaarka, garaadka, hal abuurka iyo hogaaminta. Ardayda ayaa sidoo kale lagu aqoonsan karaa wax kabadan hal qayb.

## WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

**Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada**

Booqo:

- http://assessments.dpsk12.org

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.